# Bayaanka ku saabsan cunsuriyadda loo gaystay dadka jinsiyadda Afrikaanka leh

## CUNSURIYADDU WAXAY DACAL KASTA KA SAAMAYSAA, NOLOSHA DADKA JINSIYADDA AFRIKAANKA LEH

Tani waa soo koobid bayaan oo uu sameeyey wakiilka xafiiska wadasinnaanta oo ku saabsan cunsuriyadda ay dareemeen dadka jinsiyadda Afrikaanka leh ee wadankan Finland. Bayaankan iyo arimo kale oo baadhista la darsa oo Af-fiinish ku qoran, waxa aad ka helaysaan bogga internetka: www.syrjinta.fi/XXXX

## HORDHAC

Ka cabsi-qaba Afrikaanka (Afrofoobig[1]). Cunsuriyadayntu waa arin saamayn wayn ku leh wadanka Finland, waxayna dhibaato wayn u keentaa nolosha iyo hor-umarka dadka jinsiyadda Afrikaanka leh ee ku dhaqan wadanka Finland. Dabaqad kasta oo ay yihiin ama meel kasta oo ay ka shaqeeyaanba. In qofka loo cunsuriyadeeyo jinsiyadiisa Afrikaan darteed, waxa loo yaqaan (Afrofoobig- ka cabsi-qab Afrikaan). Marka wakiilka xafiiska wadasinnaanta lala soo xidhidho, inta badan lagama dhawaajiyo dhibaatada cunsuriyadda ee lagu hayo dadka jinsiyadda Afrikaanka leh. Sidaa darteed ayuu wakiilku go'aamiyey in uu ogaado oo faham qoto dheer u yeesho, waxa kalifay in ribood-bixin badan laga bixin waayo dhibka cunsuriyadda ee dadka jinsiyadda Afrikaan leh loo gaysto iyo sababaha kala duwan ee iyaga loo cunsuriyadeeyo iyo waxyeelada ay cunsuriyaddu dadkaas noloshooda ku keento wadankan Finland.

Bayaankani waxa uu si gaar ah diiradda ugu qabtay sababaha kaliftay, in ribood-bixin badan cunsuriyadda laga soo gudbin waayey iyo baahidda loo qabo in kor loo qaado wax ka-qabadka cunsuriyadda. Sida cunsuriyadda dhanka iskuulka, shaqada iyo cunsiriyadanta kale ee ku dadban nidaamyada wadanka. Wakiilka xafiiska wadasinnaantu waxa uu muhiim u arkay, in macluumaad uruurin laga sameeyo cunsuriyadaynta maalin walba loo gaysto dadka jinsiyadda Afrikaanka leh iyo sababaha kaliftay in ribood-bixin badan looga soo gudbin waayo. Si loo hormariyo xuquuqda sinnaanta ee dadka jinsiyadda Afrikaanku leeyihiin.

## CUNSURIYADDU WAXAY DACAL KASTA KA XAGATAA NOLOSHA DADKA JINSIYADDA AFRIKAAN LEH

- Dadka jawaabta xixiyey waxay sheegeen in bil, asbuuc ama maalin kasta la cunsuriyadeeyo.
- Waxay qaarkood sheegeen in cunsuriyadayntii ugu horaysay ay dareemeen ahayd, markii ay dhiganayeen xanaanada ama fasalka 1aad.
- Waxay sheegeen in ay cunsuriyad ama dhibaato gardaraysi leh kala kulmeen adeegyada iyo goobaha degaanka magaalada, shaqada, shaqo-raadinta ama wax-barashada. Waxay sidoo kale cunsuriyad kala kulmeen adeegyada babliga ah, sida adeegga sooshalka iyo caafimaadka.

> Ma haysto fursadda... ay dadka kale haystaan. Mar walba waxa lagu mashquulaa noloshayda iyo cidda aan ahay, waxay taasi igu keentaa, xaalad aad iyo aad u adag.

[1] **Afroboobig** Waa nooc cunsuriyadayn gaar ah oo taabanaysa qofka jinsiyadda Afrikaanka leh, taas oo wax-yeelaynaysa shakhsiyaad, kooxo iyo bulshooyinka jinsiyadda Afrikaan leh. Ulajeedada ugu wayn ee macnaha Afrofoobiga ku jira, waa baabiinta biniaadanimada qofka. Waxa ku dadban taariikhdii iyo qaladaadkii laga galay dadka madow. Sidii guumaysigii iyo canbaaraynta foosha xun ee lagu tilmaamo dadka madow, taas oo ka socota boroseeska dheer ee midabtkoornimada lagu hayay mudada dheer dadkaas. Afrofoobignimadu waxay leedahay noocyo badan, waxa  soo hoos gala cay cunsuriyad leh ama dagaal gacan ulataga. Waxay noqon kartaa cunsuriyad midabtakoor oo lagu hayo kooxo ama shakhsiyaad oo waxay noqon kartaa fkir laga aaminsanyahay, sawir laga haysto ama cabsi laga qabo dadkaas jinsiyadaas leh. Taas oo kalifaysa in nidaamyada wadaanku ka tusaale qaataan fikradaha Afrofoobiga noocaas ah ee cunsuriyadu ka danbayso.

Marka bulshada dacal kasta laga eego, cunsuriyaddu meel walba way ka saamaysaa nolosha dadka jinsiyadda Afrikaanka leh. Meel kasta markaad nidaamayada ama arimaha wadanka ka eegto, waxaa hoosta ugu jira cunsuriyadayn, taas oo ku soo shaac baxaysa siyaabaha uu wadanku u shaqeeyo iyo xidhiidhada kala dhexmara shakhsiyaadka iyo kooxahaba. Waxay dadku kala kulmaan adeegyada iyo goobaha degaanka magaalada, shaqada, shaqo-raadinta ama wax-barashada cunsuriyad iyo dhibaato gardaraysi leh. Waxay sidoo kale cunsuriyad kala kulmaan adeegyada babliga ah, sida adeegga sooshalka iyo caafimaadka. Dadka ka soo jawaabay bayaankan oo inyar ka badan kalabar ayaa sheegay in booliiska, gaadh-hayaha ama xilhaye kale oo ammaanka ka shaqeeyaa, midabtakoor u gaysa.

Dhibaatada gardaraysiga leh ee dadka loo gaystay waxay u kala baxaan, ku dhago-hadal ama dhibaatayn yar oo loo yaqaan (microaggression[1]), waa ku dhago-hadal, il qalooc ku-eeg ama hadal yar oo kale oo aan macno wayn lahayn, laakiin xumaan loola jeedo, ama dagaal gacan ulataga. Waxaan se muuqan, marka qofka jinsiyadaas leh, marka guruubyada laga soocayo ama lagu soo dhexdari waayo. Tusaale ahaan marka la joogo iskuulka, goobta shaqada ama cayaaraha hobiga ah. Dad badan ayaa sheegay in hadalo xun xun lagu yidhi oo qaarkood xitaa lala dagaalamay.

Waxa laakiin warwar leh, in dadka jawaab-bixiyaha badankoodu ka dhawaajiyeen iyaga oo caruur ah in ay la kulmeen cunsuriyaddii ugu horaysay. Markaa waxay dhiganayeen xanaanada ama faslka 1aad. Waxay badankoodu cunsuriyadda la kulmeen bil kasta ama asbuuc kasta ama maalin walba.

Waxa dadka jabaab-bixiyaha badankooda loo gaysaty cunsuriyadayn isku dadban oo loo yaqaan (multi-based discrimination[2]) Xitaa dadka jawaabta bixiyey boqolkiiba 65 ayaa sheegay, in ay la kulmay cunsuriyad ka socota dhibaato qof kale gaystay. Waxa dadka inta badan loo cunsuriyadeeyey ajaanabi ahaan, luuqad ahaan, mabda' ahaan ama jinsi ahaan.

### AAMINAAD LA'AAN DARTEED AYAA KALIFTAY IN RIBOODKA CUNSURIYADAYNTA LA SOO GUDBIN WAAYO

- Qiyaastii kalabar ayaan xafiisyada u soo sheegin cunsuriyadda loo gaystay.
- Waxay dadku cunsuriyadaynta ribood-bixin uga samayn waayeeen oo ay isleeyihiin, arinkiina waxaba lagama qabanayo.
- Saddexdii qofoodba hal ayaa aaminsan, marka la cunsuriyadeeyo in ay garanayaan xuquuqdooda.

Wuxuu bayaankani sheegayaa inay dhibaato aad u wayn tahay, in dadka cunsuriyad soo-sheegidoodu aad u yar tahay. Marka xafiis-dawladeedka waxaba loo soo sheegi waayo, qofku xaqiisa ma helayo, waanay adkaanaysaa in cunsuriyadaynta wax laga qabtaa. Markaa qofka cunsuriyadda lagama daynayo ee waa lagu sii wadayaa. Marka dadka la cunsuriyadeeyey dawladda waxaba u soo sheegi waayaan, way adagtahay in la fahmaa oo tusaale ahaan la xisaabiyaa inta qof ee sanadkiiba la cunsuriyadeeyo. Markaa saas oo kale lagu fahmo in dad badani cunsuriyadda ka cabanayaan. Waxa dhici karta in xafiis-dawladeedku ogaan waayaan cunsuriyadda dadka lagu hayo oo sidaa darteed dadka ay wax u qaban waayaan.

Dadka bayaankan ka jawaabay qiyaastii kalabar ayaan xafiis-dawladeedka u sheegin cunsuriyadda lagu hayo. Waxa se jira arimo badan oo is kor saaran oo sabab u ah, in cunsuriyadda la soo sheegi waayo. Sababta ugu wayn ee cunsuriyadda loo soo sheegi waayeey waxa weeye, dadku ma aaminsana in wax loo qabanayo. In uu qofku soo sheego cunsuriyadda waxa ka horaysa in uu marka hore fahmaa xaqiisa iyo sharciyadda cunsuriyadaynta ku saabsan. Sidoo kale fahmaa in uu dhibane yahay oo uu tusaale ahaan xafiis u soo sheegi karo. Ogaado xafiisayada u dooda xuquuqda dhibanaha. Waxa muhiim ah in uu qofku dareensanyahay, in ay isaga u fiicantahay

[1] **Microaggression:** Waa hadal ama gardaro ogaan ah oo ku tiirsan ama ku salaysan cunsuriyadayn oo xoojinaysa fikradaha laga aaminsanyahay qofka ama dadka isla markaa arinku ku socdo oo lana doonayo in qofka gooni loo sooco. In qofka amaan guracan lagu taabto. Tusaale ahaan "alla oo adigu Af-fiinishka si fiican ayaad u taqaanaaye" Taas oo muujinaysa in qofka hadlkaa yidhi, la yaaban yahay in qofkan madow ama bunniga ahi sidiisa oo kale luuqada finishka ugu hadli karo. Waxay u eeg tahay arin yar oo bilaa macno ah, laakiin qofka fikir iyo culays shakhsiyadeed ayey ku ridaa.

[2] **Multi-based discrimination:** Marka qofka loo gaysto dhowr siyaabo oo cunsuriyada oo is dul saaran. Tusaale ahaan in uu ka mid yahay dadka laga tirada badan yahay ama gaar ahaan dadka diirad-du markaa saaran tahay, taasi waxay kalifaysaa in dhowr siyaabo oo kala duwan qofkaas loo cunsuriyadeeyo.

> Waxay u eegtahay in aan iska ogolaaday, weligayba cid kale mana ogaysiin umanaan sheegin in lay cunsuriyadeeyey.

in uu ribood-bixin ka sameeyo cunsuriyadda. Lakiin waxa arimahaas oo dhan ka horeeya in dhibanuhu aaminsanyahay, boroseeska ribood-bixinta, nidaamka, maamulka iyo in uu xaqiisa heli karo.

Waxay tahay in maskaxada xoog loo gashadaa, sabata aanay dadku maamulka iyo faa'iidada ribood ka bixinta cunsuriyadda, u aamini waayeen. Wuxuu bayaankani cadaynayaa in ay jiraan sababo badan oo keenaya aaminaad la'aantaa. Waxaana ka mida qaababka nidaamka sharciga iyo qaabka ribood-bixinta cunsuriyadda loo sameeyo. Waxa sidoo kale loo baahanyahay in xarumaha u xilsaaran cunsuriyadda wax ka qabtaan arimaha nocaas oo kale ah oo tusaale ahaan wakiilka xafiiska wadasinnaanta iyo xafiis-dawladeedku u jilbo dhigtaan, sababaha keenay arimahaas.

### GOOB KASTOO WAX LAGU BARTO WAXAAD KALA KULMAYSAA CUNSURIYAD, KA SOO BILOW XANAANADA

- Tirada ugu badan dadka jawaabta bixiyey ayaa iskuulada kula kulmay cunsuriyad .
- Goob kastoo wax lagu bartaba waxaad kala kulmaysaa cunsuriyad, mar ay dhanka macalimiinta ka socoto ama mar ay dhanka ardayda ka socotoba.
- Cunsuriyadda dadkaasi dareemeen waxa ka mida hadal caya ama in diirka qofka lagu xad gudbo ama inta badan mid qarsoon oo tusaale ahaan, dad ka dhex saarida oo la rabo in gooni loo sooco.
- Midabtakooraynta iyo canbaaraynta (rodullista-minen iyo stereotypisointi) midabka, jinsiyadda, iyo/ama dhanka diinta, waxay saamayn ku keentaa wax-barashada ardayda, tusaale ahaan hagidda ardayga ama qiimayntiisa casharka.

Saddedx qaybood labo qaybood dadka bayaankan ka jawaabay ee iskuulada ku dhigtay Finland, waxay sheegeen in ay dhanka wax-barashada kala kulmeen cunsuriyad ama gardaro ku saabsan diirkooda. Cunsuriyaddu way jirtaa oo markii dadkan la waraystay, waxay sheegeen iskuul kasta oo ay dhigtaan in ay kala kulmeen cunsuriyadayn. Waxay sheegeen xitaa, inay cunsuriyadayn kala kulmeen dhanka ardayda, shaqaalaha kale ee iskuulaadka, sida hagaha ardayda, neerasta iskuulka iyo macalimiintaba. Laakiin waxa aad u war war wayn, in qiyaas ahaan saddexdii qofba uu hal qof dareemay cunsuriyad markii uu xanaanada dhiganayey. Cunsuriyadda ugu badan jawaab-bixiyayaashu waxay kala kulmeen ardayda, marka tusaale ahaan iskuulka nusa saacihiisa banaanka la joogo ee maclinku ka sii jeedo.

Dadka ka soo jawaabay bayaankan, waxay ka dhawaajiyeen in cunsuriyadda ardayda iyo macalimiinta iskuuladku muujiyeen ahayd, tusaale ahaan hadalo xun oo qofka lagu yidhaahdo, in qofka hoos loo dhigi, in qofka aan waxba laga soo qaadin ama lagu gardaroodo. Lakiin waxa naxdin leh in boqolkiiba (31 %) arday iskuulka dhexdiisa gacanta loola tagay. Cayda iyo gardarada loo gaystay waxa u dheeraa in guruubyada laga dhex saaro.

> Markii fasalada dugsiga hoose laygu cunsuriyadayn jiray, macalimiintu marnaba waxba ii may qaban, kadib markii aan dugsiga dhexe u gudbay, ayaa waxa igu soo baxay cudurka niyad-jabka oo aad u khatar ah. Waxa sababaha ka mid ahaa cunsuriyadda laygu hayey ee aan dhegta loo dhigin.

Waxa uu bayaankani muujinayaa in hagitaan midabtakoorayn[1] (rodullistava) ku salaysan laga isticmaalo laba iskuul. Tusaale ahaan marka ardayga loo samaynayo hagid wax-barashadeed iyo marka uu ardaygu dhiganayo luuqadda finishka ee dadka ajaanabka loo dhigo (S2).

Waxa ardayda gaar ahaan hablaha lagu hagaa dhanka wax-barashada neerasta. Waxay jawaab-bixiyayaashu sheegeen iyaga oo aan rabin in lagu dhiiri gelieyey in ay dalbadaan iskuulada laga barto daryeelka ama neerasnimada, inkastoo aqoontooda iyo luuqadooda finishka aad u fiicnayd oo ay awoodi kareen in ay dalbadaan dugsi sare ama jaamacad.

Jaamacadda ka hor markii ay ardaydu dhiganayeen dugsiyada hoose iyo sare ayaa waxa loo diray ardayda ajaanabka ah in ay bartaan luuqadda finishka ee loo yaqaan (S2) ee loo dhigo ardayda ajaanabka, inkastoo qaarkood luuqada finishka si fiican u barteen ama ugu hadlaan sidii luuqadooda hooyo oo kale. Taas ayaa keentay in aan arday badan loo dhigin ama la bari waayo luuqadda finishka ee akadeemiga ah ee jaamacadaha lagu dhigto. Markaa sida caadada nidaamka u ah oo la odhan karo "caado-cadaannimo" (valkoisuusnormi) oo lagu fikiray ardaydani waa ajanabi uun oo sidaa darteed waa in luuqadan gaarka ah loo dhigaa, inkastoo aqoontoodu sidaa ka duwan tahay, waxay keentay in ardaydii aqoontoodii luuqaddu hoos u dhacdo.


Iskuulada jaamacadahu waxay sii adkeeyeen heerka luuqadda ee ardayga jaamacadda dalbanaya looga baahan yahay, taasi waxay kaliftay in ardaydii loo dhigi jiray (S2).ga ku adkaato boos ka helidda jaamacadaha. Markaa inkasta oo lays leeyehey way fiicantahay oo wadasinnaan ayaa ku jirta in ardayda ajaanabiga ah loo dhigo (S2).ga, laakiin taasi dib u dhac wayn ayey ardayda ku keentay wax-barashadooda.

Wuxuu bayaankani muujinayaa, in aanay macalimiintu dan ka lahayn ama dheg u dhigayn cunsuriyadaynta ardayda lagu hayo dhanka iskuulka. Laakiin wax-barashada, iyo ammaanka goobaha wax-barashada ee ardayda waxa ka masuul ah iskuulka iyo maamulka iskuulka.

Caado-cadaannimo[2] (valkoisuusnormi) Dadka kale ee caado-cadaannimada ama fkirka caadaanku leeyahay ee ay u barteen ka baxsan, waxa dhacda in macalimiinta iyo ardayda iskuulku si kale ula dhaqmaan. In canbaarayn midantakoornimo iyo canbaarayn ku saabsan "waa la lahaa" oo ka socota midabka, jinsiyadda ama diinta, lagu sameeyaa oo tusaale ahaan qaabka uu macalinku qiimaynta ardayga u samaynayo ama hagaha iskuulku ula dhaqmayo ardayga noqot, si ka duwan ardayda kale.

[1] **Canbaarayn midabtakoor (rodullistaminen):** Waa borosees dhaqan bulsheed ah oo ku salaysan in dadka koox koox loo kala sooco, taas oo dadka loo kala soocayo muuqaal ahaan ama arimo hore loogu shaanbadeeyey dartood. Waa borosees dheer oo marka taariikh ahaan la eego qoto dheer oo dadka waxa la odhanayaa waa dad saas u eeg oo noocaas ah oo sidaas oo kale u dhaqma. Waxa tusaale ahaan lagu canbaaraynayaa, dhaqankooda, luuqadooda, taariikhdooda, diintooda, awoodooda, mooralkooda, dabeecadooda iyo aqoontooda. In shaanbadda lagu dhuftana, waxa ka danbeeya fikir laga aaminsan yahay, hadalo kaftan ka yimid, cabsi laga qabo iyo waa la lahaa uun. Boroseeskan dheer ee canbaaraynta midab-takoorka leh, wuxuu keenaa in qofka la cunsuriyadeeyo ama la cuna-qabateeyo. Dadka sidan cabaaraynta midabtakoornimada leh lagu sameeyaa, waxa laga soo qaada, in waxa lagu sheegayaa yihiin sidii waxay ku dhasheen oo aan weligeed is bedelayn. Dadka Finland cabaaraynta midabtakoornimada lagu sameeyey waxa ka mid ah dadka jinsiyada Afrikaanka leh, Romaaniyiinta dadka Saamega loo yaqaan, iyo Ruushka.


[2] **Caado cadaannimo (valkoisuusnormi):** Caado cadaannimo loo-lama jeedo midabka qofka oo kaliya, waxa weeye wax-yaabaha aan la arkayn oo ay ka mid yihiin, sida qaab-dhaqanka, kala saraynta, dareenka awooda, kuwaas oo ka imanaya in dadka reer galbeedka iyo reer Yurubtu iska dhigaan ama loo arko in ay ka sareeyaan dadka kale. Markaa dadka kale ee arimahaas aan iyaga caado caddaanni-mada u ahayn ku dhaqmaa, ishaa ku dhacaysa ama diiradda ayaa la saarayaa.



Waxa jira arimo badan oo layga hor istaagay, intii aan shaqaynayey oo dhan. Shaqo joogto ah layma siin, in kastoon 3 sanno in ka badan u shaqaynayey shirkadda. Waxa se ugu daran marka asxaabta shaqadu kugu daawadaan, danna ka lahayn, marka lagu caayayo ama lagu xumaynayo.

### WAA IN LA KORDHIYAA WARGELINTA WAAJIBKA SHARCIGA WADASINNAANTA UU FARAYO SHAQO-BIXIYAHA

- Waxay dadku sheegeen, in shaqaalaha iyo macmiishu gooobaha shaqada wax ku cunsuriyadeeyaan oo dhanka shaqo-raadintana shaqo-bixiyuhu dadka cunsuriyadeeyo.
- Waxay cunsuriyadi ka jirtaa qaab-qaadashada shaqaalaha iyo shuruudaha shaqada. Waxa jira in goobta shaqadu xumaato oo taliyayaashu fikir ay aaminsanyihiin iyo cunsuriyad ku dhaqmaan.
- Waxay dadka goobaha shaqada ka taliyaa, hoos u dhigaan aqoonta ruuxa ajaanabka. Waxay ka gaabsadaan marka, qofkaas lagu gardaroonayo ama waxay iyagu ka qayb-galaan marka dadkaas midabkooda lagu caayayo. Qaab uu taliyaha shaqadu u dhaqmayo, waa shay aad u muhiim ah.



Waxay dadku sheegeen, in shaqaalaha iyo macmiishu gooobaha shaqada dadka cunsuriyadeeyaan oo sidoo kale dhanka shaqo-raadintana shaqo-bixiyuhu wax cunsuriyadeeyo. Waxa jawaab-bixiyaha bayaankan dareemay cunsuriyad dhanka shaqada ama shaqo-raadin boqolkiiba (60%). Waxay sheegeen in shaqa-bixiyaha, shaqaalaha iyo macmiishuba cunsurinimo ku dhaqamaan, hadii ay tahay shaqada babliga ama tan barayfadkaba. Waxay jawaab-bixiyuhu sheegeen in ay ugu daran tahay, markay shaqada raadinayaan iyo markay goobta shaqada joogaanba. Waxay sidoo kale sheegeen, in lagu adkeeyo ama dib loodhigo dallacsiinta, qofka inkastoo uu aqoon wax-barasho u leeyahay. Waxay sidoo kale sheegeen in cunsuriyadi ka jirto dhanka mushaharka iyo arimaha kale ee xidhiidhka shaqda la darsaba.

Waxay cunsuriyadi ka jirtaa shaqo-raadinta iyo arimaha kale ee xidhiidhka shaqda la darsaba. Cunsuriyadda iyo fikirka qaladka ah ee taliyayaasha shaqadu aaminsanyihiin, ayaa xumeeya goobaha shaqada. Waxa ay taliyayaasha shaqadu canbaareeyaan aqoonta shaqaalaha ama aanay dheg u dhigin gardarada loo gaysanayo, cunsurinimo darteed oo ay iyagu ka soo qayb- galaan cayda midabtakoornimada. Waa shay aad u qaali ah qaab-dhaqanka taliyaha goobaha shaqada.

Cunsuriyadda ama gardarada shaqaalaha iyo macmiisha sida gardarada dadka bukaanka gaysanayaan, waa mid aad u xag jirta. Waxa in badan laga dhawaajiyey, doorka shaqaalaha kale ee la wada shaqeeyaan ka qataan cunsuriyadda. Tusaale ahaan shaqaalaha goobta shaqadu, cunsurinimo darteed, waxay hoos u dhigaan aqoonta qofka ajaanabka ah ee la shaqaynaya ama caawin ma siinayaan.

Way ka aamusayaan, marka qofka lagu gardaroodo ama la cunsuriyadeeyo. Masuulka shaqadaduna, waxaad moodaa in aanu dan ka lahayn, marka tusaale ahaan macmiishu shaqaalihiisa caayayaan.

Dumarkana waxa loo cayaa qaab-galmeedkooda oo cunsuriyad leh.

**EREYADDA GABAGABADA**

Cabsida madowga laga qabo ee cunsuriyadaynta leh ee loo yaqaan (Afrofoobiga) iyo midab-takoorayntu waa arimo dhanka bulshada Finland aad xag-jir uga ah. Waana in la ogolaado oo la aqbalaa in wadanka arimahani ka jiraan. In cunsuriyadayn badani wadanka ka jirto waxa cadyanaya bayaankan iyo baadhitaano kale oo la sameeyey. Waxay sidoo kale batay kayd-uruurinta booliiska ee danbiyada nacaybka iyo la soo xidhiidhka xafiiska wakiilka wadasinnaanta.

Bayaanka uu sameeyey wakiilka xafiiska wadasinnaanta iyo macluumaadka ka soo baxa ulajeedadiisu waa, in sidii hore si ka sii fican wax-looga qabto cunsuriyadda lagu hayo dadka jinsiyadda Afrikaanka leh ee dagan Finland. Macluumadkan bayaanka ka soo baxaa waxay noo suurto gelinaysaa qorshayn iyo isku dubaridid ka tayo badan wax-qabadkii iyo hor-umarintii hore ee wadasinnaanta ee dadka jinsiyadda Afrikaan leh hore loogu qabtay.

Si dadka liita ama qarqarka saaran xaqooda aasaasiga, biniaadannimadooda iyo wada sinnaantooda dadka kale loo suurto geliyo, waxay tahay in maamulka dawladda lala socodsiiyaa xaaladda cunsurinimaddu meesha ay marayso maanta. In la ogyahay xaaladda cunsuriyadayntu kolba meesha ay marayso, waxay fududaynaysaa jihaynta wax-qabadaka iyo taakulaynta, si dadka dhibaataysan isla markaaba wax loogu qabto. Ribood-bixinta yar ee dadka la cunsuriyadeeyey wakiilka xafiiska wadasinnaanta soo gaadhsiinayaan, waxay dhib ku keenaysaa in wax loo qabto.

Waxaan rajaynaynaa in xasiis-dawladeedyada kale, Iskuulada iyo shaqo-bixiyayaashu ka faa'iidaystaan macluumaadka ka soo baxa bayaankan. Gaar ahaan xafiis dawladeedyada iyo kuwa kale ee u xilsaaran hor-umarinta wadasinnaanta goobaha iskuulada iyo shaqada. Waxa haboon in ay arkaan dhibaatooyinka uu bayaankani muujinayo. Waxa aanu arinkan kala hadli doonaa wasaarada wax-barashada iyo dhaqanka, wasaarada shaqada iyo ganacsiga iyo xilhayaha shaqo-dhowridda maamul-dawladeedka degaanka.

Waa in loo soo jeestaa oo taageer loo helaa oo xil laysa saaraa la dagaalanka cunsuriyadaynta. In cunsuriyadda iyo hadaladda nacaybka leh meel laga wada istaagaa, waa arin aad iyo aad u muhiim ah. Illaa iyo inta hadaladan nacaybka leh laga dhawaajinayo oo diwaanka siyaasadda cunsurinimo laysla dhex marayo, waxa sii kordhaya uun nacaybka iyo cunsuriyadda. Shaqada ka hor-tagga ee la qabanayaa markaa waxba tari mayso. Si aan midabtakooraynta iyo cunsuriyadda nidaamyada ku dhisan u bedelno, Waxa maamul-dawladeedka looga baahan yahay in ay si dhab ah u qaataan dhibaatada oo kadibna ku dhaqaaqaan oo hirgeliyaan wadasinnaanta dadka oo dhan. Waana arin ay iyaga masuuliyad wayni ka saaran tahay.

